

# Barnaamijka WIC ee Minnesota: Waajibaadkaaga iyo Xaquuqdaada

12/2018

## Waxa aad kafilan karto WIC

**Waxbarashada Nafaqada.** WIC waxay kusiinaysaa tilmaamo iyo talo si lagaaga caawiyo inaad qoyskaaga siiso cunto caafimaad qabta.

**Macluumaadka.** Waxaan kaacaawinaynaa inaad hesho daryeel caafimaad, talaalo iyo barnaamijyo kale.

**Cuntooyinka WIC.** Waxaan kusiinaynaa kaarka WIC si aad ugu iibsato cuntooyin caafimaad qaba.

**Sinaanta Ladhaqanka.** WIC iyo shaqaalaha dukaankuba waxay kuula dhaqmayaan si lamid ah dadka kale ayadoon laga fiirinayn isirkaaga, midabkaaga, da'daada, wadankaad kasoo jeedo, naafonimadaada, ama jinsigaaga. Hadaad isleedahay waa lagu takooray, waxaad cabasho ugudbin kartaa USDA (gadaal kafiiri).

**Helitaanka.** Noosheeg hadaad ubaahantahay turjumaan - adeegyada turjumaanka oo lacag la'aan ah ayaa laheli karaa. Hadaad tahay qof naafo ah, adeegyo gaar ah ayaa lagu siinayaa.

**Cadaalada.** Waxaad codsan kartaa dhagaysi dacwadeed hadaadan kuqancin go'aanka shaqaalaha WIC ee ku aadan xaqa aad uleedahay adeegyada WIC.

**Isticmaalka macluumaadka.** Macluumaadka aad siiso WIC waa mid adigga kuugaar ah. Waxaa oo adeegsanayaa in lagu go'aansho hadii adigga ama cunugaagu aad xaq uleedihin adeegyada WIC iyo sida ugu fiican ee laydinku adeegi karo. Ayadoon lahelin macluumaadka buuxa, waxaa suuragal ah inaan awoodin xaqiijinta adeegaaga WIC. Macluumaadka waxaa kaliya lalawadaagi karaa dadka xariirka tooska ah la leh maamulka WIC, ilaa inaad ogolaansho saxiixdo mooyaane. Waxaa sidoo kale loo adeegsan karaa warbixinada iyo

xisaabaadka, laakiin magacaga lama adeegsan karo.

**U giirista wadan kale?** Faa'dooyinkaaga WIC halkaas ayuu ka soconayaa. Noo sheeg ka hor inta aadan aadin iyo waxaan ku siineynaa ogeysiinta wareejinta oo aad hore u qaadid.

## Waxa WIC ay kaafilanayso

**Ilaali xiliyada balanta.** Fadlan wac xaruntaada caafimaad ee WIC hadaad rabto in balanta markale lagu qabto.

**Xeerka guud.** Waa inaad kuladhaqantaa WIC iyo shaqaalaha dukaanka xushmad iyo karaamo.

**Si sax ah u isticmaal kaarkaaga WIC.** Tani waxay kadhigantahay:

- Kujoogso dukaanada WIC kashaqeeyo.
- Kaliya ku iibso cuntooyin haraadiga gunooyinkaaga inta lagu jiro waqtiga la cayimay.
- Gunooyinka cuntada ee waqtigoodu dhacay ama lafuray lama badeli karo.
- Ha iibin, ama iib ha ubandhigin, ganacsi, ama hasiin cidkale kaarkaaga WIC, cuntooyinkaaga, bamka naasaha ama cuntooyinka caruurta.
- Hakubadalan ama hadhaafsan cuntooyinka WIC iyo nafaqada ilmaha lacag, dayn, ama waxyaabo ay iskuqiimo yihiin cuntada.
- Usheeg WIC hadii kaarkaagu dhumay, laxaday, ama jabo.
- Xafido kaarkaaga WIC iyo BIINKiisa. Kaliya lawadaag BINkaaga kaliya dadka fsaxa uhaysta inay kaarkaaga adeegsadaan.
- Kaqaado kaarka WIC kaliya hal xarun caafimaad oo WIC hoos tagya xiligaad doonto.
- Usharax shuruucda iyo sida loo isticmaalo Kaarka WIC dadka kula isticmaalaaya.

**Runta.** Hadaad wax qariso ama macluumaad been ah sheegto si aad uqaadato gunooyinka WIC, waxaa suutagal ah in barnaamijka lagaa saaro,

aadna dib ubixiso lacagtii lagu siiyay cuntada aadan xaqa ulahayn inaad qaadato, ama waxaad waajihi kartaa talaabooyin sharci.

Sida kucad sharciga xaquuqda madaniga ah ee heer Federal iyo xeerarka iyo sharciyada Waaxda Beeraha ee Maraykanka (USDA), USDA, wakaaladaheeda, xafiisyadeeda, iyo shaqaalahaheeda, iyo wakaaladaha kaqaybqaadanaaya ama maamulaaya barnaamijyada USDA waxaa kamanuuc ah inay qof utakooraan sababo laxariira isirkiisa, midabkiisa, wadankuu kasoo jeedo, galmadiisa, naafonimadiisa, da'diisa, ciqaab ama aargoosi kadhan ah in qofku xaquuqdiisa madaniga ah raadsado barnaamij ama shaqo ay fuliso ama maalgaliso USDA.

Dadka naafada ah ee ubaahan adeegyada gaarka ah ee dhanka isgaarsiinta si ay uhelaan macluumaadka barnaamijka (tusaale, qoraalka tabashada, farta waawayn, codka, Luuqada Ishaarada ee Maraykanka, iwm.), wa inay laxariiraan wakaalada (gobalka ama deegaanka) ay kacodsadeen gunooyinka. Dadka dhagoolayaasha ah, maqalka culus ama naafada ka ah hadalka waxay laxariiri karaan USDA ayagoo usii maraaya Haayada Adeegga Federal Relay oo nambarkeedu yahay (800) 877-8339. Waxaa intaas sidheer, macluumaadka barnaamijka ayaa lagu heli karaa asagoo kuqoran luuqado aan ka ahyn Ingiriiska.

**Si aad udirto cabasho kadhan ah barnaamijka oo ku aadan takoor lagu gaystay**, Buuxi [Foomka Cabashada kadhanka ah Takoorka ee USDA](#), (AD-3027) kaasoo laga jeli karo:

<https://www.usda.gov/sites/default/files/documents/USDA-OASCR%20P-Complaint-Form-0508-0002-508-11-28-17Fax2Mail.pdf>, iyo xafiis kasta ooy leedahay USDA kuna sheeg waraaqda dhamaan macluumaadka foomka looga baahanyahay. Si aad ucodsato koobiga foomka cabashada, wac (866) 632-9992. Udir foomkaga ood buuxisay ama waraaq USDA adoo umarinaaya:

1. **boostada:** U.S. Department of Agriculture  
Office of the Assistant Secretary for Civil Rights  
1400 Independence Avenue SW  
Washington, D.C. 20250-9410;
2. **fakiska:** (833) 256-1665 ama (202) 690-7442 (202) 690-7442; ama
3. **email:** [program.intake@usda.gov](mailto:program.intake@usda.gov)

Thaayadaan waxay bixisaa fursad loosimanyahay.